

# Waaxda Kahortaga Dabka Seattle

220 3<sup>rd</sup> Avenue S.

Seattle, WA 98104-2608

Iimeelka: [permits@seattle.gov](mailto:permits@seattle.gov)



## Shahaadooyinka Oggolaanshaha Dagista ee Qasabka Ku ah golaanshiyaasha Goobaha Cusub ee La iskugu imaado

Shahaadada Ogolaanshaha Dagista (C ga O) waa qayb muhiim u ah hanaanka dib u eegista ogolaanshaha marka ogolaansho lasiinaayo goobaha dadku iskugu imaadaan. Shahaadada Oggolaanshaha Dagista waa dukumiinti ay soo saarto Seattle Department of Construction and Inspections (SDCI, Waaxda Kormeerka iyo Dhismaha ee Seattle), oo horay loogu yeeri jiray Department of Planning and Development (DPD, Waaxda Qorshaynta iyo Hormarinta). Waxay xaqijisaa ku dhaqanka dhismaha ee xeerarka iyo sharciyada kale ee dhismaha quseeya, ayadoo sheegaysa in dhismuhu ku haboon yahay in la dago. Shahaadada C of O waxaa sidoo kale ku jira xog ku saabsan dadka dhismaha geli kara.

### Waa maxay sababta Codsiyada Ogolaanshaha SFD ay ugu Baahan yihiin Shahaadada Ogolaanshaha Dagista?

Koobiga shaahadada C of O waa in lasoo raaciyyaa codsiyada noocyada ogolaanshiyaasha soo socda:

Taxanayaasha 2501: Goob dadku iskugu yimaado, oo khayri ah

Taxanayaasha 2502: Goob la iskugu yimaado, oo dadka soo galaaya u dhaxeeyaan 100-999

Taxanayaasha 2504: Goob la iskugu yimaado, oo dadka soo galaaya yihiin 1,000+

**Xagee ayaan ka helayaa Koobiga Dukumiintiga Shahaadada Ogolaanshaha Dagista?** Diiwaannada la aruurshay sanadihii lasoo dhaafay ayaa laga baari karaa lagana daabacan karaa oonleenka barta

<http://web6.seattle.gov/dpd/edms/>. Codsiyada waxay ka baari karaa dhammaan diiwaanada dhismaha ee la heli karo Maktabada SDCI Microfilm ee SDCI, oo ku taala 20th floor of Seattle Municipal Tower at 700 Fifth Ave., (206) 233-5180. **Ogoow:** Baarista xogta taariikhda ayaa noqon karta mid adag waayo xeerarka gelitaanka dhismaha ayaa is badalay marar badan intii muddo ah. C of O yada ayaa markii ugu horaysa shardi laga dhigay gudaha Seattle sanadkii 1956. Tani waxay ka dhigan tahay in dhismayaasha duqa ah ee aan badalin xeerarka gelitaanka aysan ku jiri doonin diiwaannada C of O ee yaala SDCI. Markay sidaan dhacdo, macaamiisha ayaa u baahan kara inay bilaabaan nidaam cusub oo ay SDCI ku siinayso shahaadada C of O. Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan C of O, wac Adeegyada Kormeerka ee SDCI (206) 684-8950. Sidoo kale arag xaashida xogta SDCI #120 ee ku aadan Qaadashada Shahaadada Ogolaanshaha Dagista: <http://www.seattle.gov/DPD/Publications/CAM/cam120.pdf>.

**Sidee ayaan ku gudbinayaa Dukumiintiga Shahaadada Ogolaanshaha Dagista aan u diraayo SFD?** Koobiga Shahaadada waa in lagu diraa iimeelka (sida fiican) [permits@seattle.gov](mailto:permits@seattle.gov) adoo soo raicinaaya foomamkaaga codsiga. Codsiyada ogolaanshaha ayaa laga heli kara webseetkeena oo ah <http://www.seattle.gov/fire/business-services/permits>.

**Miyay Seattle Fire Department Bixisaa Caawimaad?** Haa. Kooxdeena ogolaanshaha ayaa xog guud ka bixin karta hanaanka codsiga ogolaanshaha iyo kormeeraadeena ku dhaqanka xeerka ayaa bixin kara tilmaan qaas u ah xeerka haddii loo baahdo. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo ogolaanshaha goob cusub oo la iskugu yimaado, fadlan wac xafiiskeena (206) 386-1450 kadibna codso in lagula hadalsiyo xubin ka socda Kooxda Ogolaanshaha ama Waaxda Ku dhaqanka Xeerka. **Su'aalaha quseeya shahaadooyinka Oggolaanshaha Dagista ayaa loo gudbiyaa waaxda Department of Construction and Inspections** ood ka wacayso (206) 684-8950 waayo ayagaa soo saara oo haya diiwaanadaan.